



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Dowlad Goboleedka Galmudug

Xafiiska Madaxweynaha

جمهورية الصومال الفدرالية

حكومة إقليم جلمداج

مكتب الرئيس

Galmudug State
Office of the President

Tix: XMGM/03/0024

Tr: 21/03/2017

Hambalyo Hambalyo Hambalyo

Dowlad Goboleedka Galmudug waxay halkaan uga diraysaa hambalyo iyo bogaadin Wasiirada Cusub ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo maantay Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya Xassaan Cali Kheyre uu soo xulay.

Xulashada Wasiirada cusub ayaa muujinaysa in Ra'iisul Wasaaruhu uu si degan oo Soomaalinimo kujirto usoo doortay Wasiiro aqoon leh, laguna yaqaan karti iyo hufnaan. Xulashadan waxaa kale oo ay muujinaysaa in madaxda Soomaalidu ay ka muuqato bisayl siyaasadeed oo dhiiri galinaysa in dhammaan lagawada qeyb qaato siyaasadda wadan qof walbana ay suuragal tahay inuu ku biiriyo aqoontiisa iyo kartidiisa marka uu soo maro waqtigu.

Waxaa Baarlamaanka Soomaaliyeed ka rejeyneynaa in Wasiirada cusub la ansixiyo magacaabistooda si waqtii uusan uga lumin ummadda Soomaaliyeed laguna dhiiri galiyo siday kaalin weyn uga qaadan lahaayeen inay wax kabadalaan xaaladda wadanku ku sugaran yahay haatan.

Dowlad Goboleedka Galmudug waxay Ilaalay uga baryeysaa Wasiirada cusub in ay u horseedaan ummadda Soomaaliyeed nabad, midnimo, horumar iyo cadaalad ay kaga baxaan dhibaatada iyo abaaraha hareeyey.

Dhammaad

Xaafiska Kusimaha Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug